


Tijaabada COVID-19



SOMALI

Denmaark waa dal ka mid ah dalalka adduunka, ee tijaabada ugu badan qaada marka loo firiyo tirada dadka ku nool. Waa muhiim in cadaadiska is-qaadsiinta hoos loo dhigaa, xanunkana la xakameeyaa.

Gudaha Denmaak waxaanu tijaabinaa dadka qaba calaamadaha xanuunka iyo dadka aan qabin calaamadaha xanuunka.

Calaamadaha COVID-19 tusaale ahaan waa: xumad, qufac, qaadashada hawa- da oo adag, madax-xanuun, murqo- xanuun ama dhuunta oo ku xanuunta.

Tag guriga iskuna go'doomi oo joog guriga, haddii Aad isku aragto calaamadaha xanuunka

Haddii Aad iska dareento xanuun oo Aad leedahay calaamadaha COVID-19, waa inaad sameysaa arrimaha soo socda:

- Tag guriga oo joog guriga, ilaa tijaabo Aad iska qaado
- Halagu baaro - xasuuusana af- xirashada
- Tag guriga tijaabada kadib oo joog guriga, ilaa Aad ka hesho jawaab.

Sidaan ayaad u dalban kartaa tijaabada

Ka dalbo ballan tijaabo bogga coronaprover.dk marka ay jiraan xaaladahaan soocoda:

- Adiga oo dareemaaya caafimaad, una baahneyn inaad la hadashid dhakhtar, laakin aad dooneysyo in lagu tijaabiyo haddana
- Adigoo leh calaamado khafiif oo COVID-19 ah, laakin aan u baahneyn inaad la hashid takhtar.

Xasuuso, inaad isticmaasho NemID-gaaga, marka aad ballanta tijaabada ka dalbaneysyo bogga coronaprover.dk

Wac takhtarkaaga am 1813 marka ay jiraan xaaladahaan:

- Wuxaad leedahay calaamadaha COVID-19, wuxaad dareemeyso xanuun daran, oo aad dooneysaa inaad la hadasho dhakhtarkaaga
- Waad wel-welsan tahay ama shaki baa kugu jira
- Waa inaad tijaabo ka qaado cunug ka yar 2 sano.

Adiga xitaa waxaa haboon in tijaabiyo lagaa qaado, haddii qof kuu dhow xanuunka la soo qaadsiiyey. Qof kuu dhow caadi ahan waa dadka, aad la nooshahay, ama wada seexataan, laakin waxa ay noqon karaan macariifo iyo saaxiibada, aad u dhoweyd.

Markaas waxaa haboon in lagu tijabiyo, haddii lagaa dalbado arrinkaa. Tusaale ahaan waxaa ay noqon kartaa marka cusbitaal laguu seexiyo, daaweyn, amabaaritaan amaba qeyb ka mid ah ogaanshaha xanuun la isku-daartey kaas oo ka dillaacay iskuulada, guryaha/xaafadaha la deggen yahay, ama goobaha shaqo.

Sidaan ayaad ku heli kartaa natijjada tijaabada

Waa inaad bogga sundhed.dk ku furtaa NemID gaaga si aad u hesho natijjada tijaabada.

Haddii Aad tahay qof COVID-19 lagu daartay, waxaa ku qoran, in tijaabodu tahay 'Positiv', Formodet positiv' ama 'Påvist' waa lagaa helay'. Ma tahay qof la qaadsiiyey xanuunka, waa muhiim Aad iyo Aad ah, inaad is-go'doomiso, si aadan dadka kale u qaadsiinin.

Haddii Aad lagu qaadsiinin COVID-19, waxaa ku qoran, in tijaabodu tahay 'Negativ' ama 'Ikke påvist' 'lagaama helin'.

Ka akhri waxyaabo badan oo ku saabsan COVID-19 bogga **coronasmitte.dk**

Haddii Aad qabto su'aalo ku saabsan COVID-19, waxaa wici kartaa khadka taleefonka wadajirka ah ee dowladda oo ah tlf: 7020 0233.